# Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka

## Xafiiska Xuquuqda Rayadka
## Foomka Cabashada Takooridda

**1. Qor warbixinta adiga kugu saabsan.**

Magacaaga Hore: ____________________ Magacaaga dambe ____________________________________

Ciwaanka: ______________________________________________________________

Magaalada: __________________________ Gobolka:_____________________ Boosta: ______________

Lambarka Taleefonka-Maalintii:____________________________ Fiidkii: ____________________

Waqtiga ugu fiican ee lagu soo wici karo:_________________________________________________________

Ciwaankaaga E-mailka: ______________________________________________________________________

**2. Haddii aan ku wayno yaa kale oo aanu la hadli karnaa?**

Magaca qofka: ____________________________________ Maxaad isku tihiin: _____________

LambArka Taleefobka qofkaasi maalinimada lagala xidhiidhi karo:

__________________________________________________

3. **Yaa la takooray? Ku calaamadee jawaabtaada**

☐ Naftirkaaga ☐ Qof kale

Haddii uu qof adiga kaa baxsan yahay, fadlan soo raaci;

Magaca qofka wax la yeelay: ______________________________________________________________

Lamb. Tel. ee maalintii: ___________________________ Fiidkii: ____________________________

Maxaad isku-tihiin (Tusaale wiilkaaga ama gabadhaada)________________________________________

Ciwaanka qofka wax la yeelay, (**haddii uu ciwaankaaga ka duwan yahay**): __________________________

Magaalada: _________________________ Gobolka:______________________ Boosta: _______

*Haddii qofka wax la yeelay uu 18 sano jir ama ka weyn-yahay ka hor intaan cabashadan laga shaqayn waxaannu u baahanahay saxeexa qofka. Haddii uu qofku ilmo yar-yahay, adiguna aanad awood sharciyeed u haysan in aad magaca ardayga cabsho ku-soo gudbisid, waxaa loo baahanayaa saxeexa waalidkiisa ama koriyihiisa sharciyaysan*

**4. Machad nooce ah ayaa takooridda gaystay?**
(Sharciyada OCR waxay gaadhsiisan-yihiin dugsiyada, kuliyadaha, jaamicadaha iyo goobaha akhriska).

Magaca Machadka: ___________________________________________________________________________

Ciwaanka: ______________________________________________________________

Magaalada: ______________________________ Gobolka: ________________ Boostada: ________

Dugsiga ama waaxda waxbarashada ee ku lug lahayd: ______________________________________

**Miyaad isku dayday in aad cabashadaada aad xal ugu heshid adiga oo maraya habka cabashooyinka ee machadka, dhegeysi nidaam xuquuq dhawriseed, ama wakaalad kale?**

☐ Haa ☐ Maya

**Haddii ay jawaabtu "Haa" tahay na sii warbixinteeda:**

Magaca wakaaladda: __________________________________ Taariikhda aad gudbisay: ___________

Heerka ay cabashadu wakhtigan xaadirka ah marayso:

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

( Haddii aad boos dheeraad ah u baahatid, fadlan isticmaal xaashi kale)

**5. Sharax takooridda**

OCR waxay hirgelisa xeerarka mamnuucaya takooridda ku-salaysan qolada, midabka, dalka aad ka soo- jeeddid, jinsiga, laxaad-la'aan iyo/ama da'da

Takooridda laguu gaystay maxay ku Salaysnayd **?** (mid ka badan waad dooran karta)

☐ Qolada ama midabka ☐ Dalka aad ka soo jeeddid ☐ Laxaad-la'aan ☐ Jinsiga
☐ Da'da ☐ Aargoosi laga samaynayo fayl aad xereeysay ama xuquuqdaada ood muujisay

Booska hoose si gaar-gaar ah ugu muuji takooridda lagu gaystay. Fal kasta oo lagu gaystay waxaad soo raacinaysaa:

- Taariikhda (taariikhaha) uu falka (Falalka ) takooriddu uu dhacay (dhaceen)
- Magaca (yada) shaqsiga (yaadka) la takooray
- Wixii dhacay
- Markhaatiyo (haddii ay jiraan)
- Maxaad rumaysantahay in ay tahay sababta laguu takooray: [qolo, jinsi, laxaad la'aan, ama sabab-kasta ood kor ku soo sheegtay] ama maxaad ugu malaysay in ay aargoosi ahayd.

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

________________________________________________________________________________

(Haddii aad u baahantahay boos dheeraad ah xaashi kale isticmaal)

**Ma haysataa xog qoraal ah oo aad u malaynaysid in uu cabashadaada taageerayo?**

☐ Haa ☐ Maya

Waxaa lagula yeelan doonaa xidhiidh si wixii war xogtan ugu soo gudbisid (**Fadlan dukumantiyada asalka ah ha soo dirin**)

6. **Waa in cabashadaada aad xereysid 180 maalmood gudahood kaddib markii laguu gaystay takooridda**

*Sharciyaada ann hirgelinaynoo waxay uu bahanyiihiin in cabashooyinka lala xareenayo xaafiiskan 180 maalmood gudaheed markii cabashada la eedeenayoo ay dhacday. Haddii ficilka eedeeynta takoorida uu dhacay 180 maalmood ka –hor taariikhdii boostada la calaamadeeyay ama taariikhdii la guddoomay cabashada, waxaad codsan karta in laga tanaasulo xeerka xadka 180-ka maalmood ah.*

Sheeg taariikhdii ugu dambeysay ee ay takooriddu kugu dhacday ________________________________

Miyaad codsanaysa tanaasulida xeerka in aad xarayso cabashadada 180 maalmood gudaheed marka takooridu dhacdo, haddii takooridadu ay dhacday 180 maalmood ka- hor markii aad xaraysay cabashadadii?

☐ Haa ☐ Maya

Sheeg sababta aad cabashadaada ugu soo qudbin weyday 180 maalmood ka hor:

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

(Haddii aad boos dheeraad ah u baahatid, isticmaal xaashi kale)

7. **Maxaad doonaysaa in uu machadku sameeyo cabashadada darteed? Wa maxay hagaajinta aad raadinaysaa?**

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

________________________________________________________________

(Haddii aad boos dheeraad ah u baahatid isticmaal xaashi kale)

**8.** **Fadlan akhri *Foomka Ogolaashada* iyo *Xogta Ku- Saabsan Hannaanka Xalinta Cabashooyinka ee OCR*. Ka hor inta anaan bilaabin ka shaqaynta hor ee cabashadaadan, waxaa qasb ah in aad cabashadaada iyo *Foomka Ogolaanshaha* aad saxeexdid .Saxeex foomkan hoose, taariikhdana ku qor oo u dir xafiiska fulinaya.**

(Saxeex) (Taariikh)

# *Foomka Ogolaanshahaa ee Xafiiska Xuquuqda Rayadka*

***Foomka Ogolaanshahaa ee Xafiiska Xuquuqda Rayakka***

## Fadlan Saxeex, taariikhdana ku qor qaybaha A ama B:

Magacaaga ku qor: ______________________________

Magaca machadka laga cabanayo: _______________________________

**A.** Waxaan akhristay **ogaysiiska ku-saabsan isticmaalyada baadhitaanka ee xogta shaqsiyeed**. Dacwo Ogee ahaan waxaan ogsoonahay in muddada uu baadhitaanku socdo, magacayga iyo aqoonsigayga shaqsiyeed haddii loo baahdo in loo shaacin karo dadka jooga machadka baadhitaanka lagu samaynayo, maadaama aan ahay qofkii cabanayay. Ogolaanshayga waan bixiyey. Waxaa kale oo aan garanayaa in sida uu dhigayo sharciga xoriyadda xogtu, in si waafaqsan baadhitaankan ay OCR u shaacin karto xogta aniga la iga ururiyay, marka laga reebo xaaladaha qaarkood, sida marka ay shaacintu ay dhaawici karayso shaqsiyaddayda gaarka ah.

____________________________________________

(Saxeex) (Taariikh)

AMA

**B.** Waxaan doonayaa in aan xeraysto cabashadan laakiin ma ogoli in warbixin shaqsiyeed la adeegsado. Waxaan akhristay ogaysiiska ku-saabsan isticmaalka baadhitaanka ee xogta shaqsiyeed, waxaanan garanayaa in OCR ay cabashadan xidhi karayso haddii ay baadhitaanka sii wadi kariwaydo aqoonsigayga oo ay shaacin kari waydaya wgeed.

____________________________________________

(Saxeex) (Taariikh)

# Xafiiska Xuquuqda Rayadka

## Ogeysiis ku Saabsan Isticmaalka Xogta Shakhsiyadeed ee Baadhitaanka

Si loo xaliyo cabashadaada, OCR waxay u baahan kartaa in ay urursato ama falanqayso xogta shakhsiyeed sida kuwa ku jira galka ardaynimo ama shaqaalenimo. Ma jiraan sharciyo kugu qasbaya in aad OCR siisid warbixintaada shakhsiyeed ama cunaqabatayn xagga cabashooyinka kugu soo rogaya haddii aad warbixin siin waydo ama mid lagu soo rogayo dadka kale ee gacan ka dhiiban waaya bixinta xogta muddada xallinta cabashu socto. Hase yeeshe, haddii ay OCR heli kari-waydo warbixinta ay u baahantahay si ay cabshada u xaliso, waxaa laga yaabaa in ay xidho badhista cabashadaada.

Dhammaan wakaaladhaa Federaalka ee ay OCR-na ka mid tahay, warbixinta shakhsiyeed ee loo soo gudbiyo waxaa xukuma sharciga shakhsiyadda ku-saabsan ee 1974, 5 U.S.C § 552 a iyo sharciga xoriyadda xogta (FOIA) 5 U.S.C § 552

Sharaiga shakhsiyadda ee 1974 ka ayaa shakhsiyaadka ka ilaalinaya in ayan shakhsiyaadku si xadgudub ah u isticmaalin xogta shaqsiyeed ee ku jirta gacanta dawladda Federaalka.Wuxuu sharcigani qusaynayaa dukumantiyada magacyada shakhsiyeed ku-xafidan, lambarka amniga bulshada ama waxyaalaha kale ee shaqsiga tilmaamaya. Wuxuu sharcigani xukumayaa habka loo ururinayo, loo ilaalinayo, loo isticmaalayo iyo habka loo baahinayo qaar ka mid ah xogta shakhsiyeed ee ku jira faylasha Wakaaladaha Federaalka.

Xogta ay OCR ururinayso waxaa falanqaynaya shaqaalaha awoodda loo siiyay ee wakaaladda ka tirsan, waxaana loo isticmaalayaa keliya hab waafaqsan xuquuqda rayadka.Hase yeeshe, si ay cabashadada u xaliso waxaa laga yaabaa in OCR ay qaar xoga shakhsiyeed ka tirsan ay la socodisiiso shakhsiyaad wakaaladda ka baxsan si ay xaqiiqooyinka u baadho ama xog dheeraad ah u urursato. Arrimaha la shaacinayo waxaa ka mid noqon kara da'da ama xaaladda jidhaka ee qofka cabanaya. Waxaa kale oo suurta-gal ah in FOIA ay OCR-ta ka dalbato in ay xog u shaaciso (sida hoosta lagu muujiyay). OCR wakaaladna ama shaqsina wax warbixin ah masiinayso waxaanan ka ahayn 11 xaaladood ee ku jira xeerka waaxda ee 34 C.F.R § 5 b.9(b)

OCR ma shaacinayso magaca shaqsigsa ama arrimo kale oo qofka tilmaami kara haddii ayna ka ahayn arrimo loo baahanyahay si loo dhamaystiro baadhitaanka lagu samaynayo machadka sharciyada ku had-gudbay, ama haddii ayna ahayn mid shaacinteedu ay waafaqsantahay shariciga shakhsiyadeed ama sharciga FOIA. OCR waxay si qarsoodi ah u haynaysaa aqoonsiga shakhsiga cabanaya haddi ayna jirin arrin kalifaysa si loo fuliyo sharciga xuquuqda shaqsiyeed ama haddi FOIA ayna u baahan ama uusan u baahan sharciga shakhsiyadeed ama sharci kale.

Sharciga Xoriyadda Xogtu (FOIA) wuxuu dadwaynaha siinayaa xuquuq ay ku baadhi karaan faylasha wakaaladaha federaalka. Shakhsiyaadku waxay waxyaalo kaladuwan ka heli karaan qaybo badan oo iyaga qusaya iyo kuwo aan iyaga qusaynba oo ku jira galalka wakaaladaha federaalka .OCR waa in ay xurmayso codsiyada FOIA marka arrimaha qaarkood laga reebo. Guud ahaan, OCR loogama baahana in ay shaaciso dukumantiyada hawlahooda xal raadintu ay socto, haddi ay shaacintoodu saamaynayso kartida OCR-ta ee fulinta hawsha. Sidoo kale, wakaladda federaalku waxay diidi kartaa codsiga lagu doonayo faylasha loo rabo ujeeddo fulin sharciyeed ah oo ay shaacintoodu ay shaqsiyadda qofka wax u dhimi karto. Waxaa kale oo la diidi karaa dukumantiyada xaaladda caafimaad la xidhiidha ee si cad wax ugu dhimi kara shakhsdiyadda qofka xogtaa iska leh.